

TILMAAMO KU SOCDA COD BIXIYAASHA

1. SI AAD UGU CODAYSO mid ka mid ah su'aalaha soo socda, ku buuxi goobinta ay ku qoran tahay HAA.
2. SI AAD UGA HOR TIMAADO mid ka mid ah su'aalaha soo socda, ku buuxi goobinta ay ku qoran tahay MAYA.
3. SI AAD U CODAYSO, U BUUXI GOOBINTA SIDAAN OO KALE:
4. Haddii aad qalad samayso, jeex waraaqda, ama burburi waraaqda cod bixinta, ku celi sarkaalka doorashada kadibna soo qaado waraaq cod bixineed oo kale. HA TIRTIRIN.

1. ANISIXINTA MIISAANIYADA DUGSIGA EE SANAD DHAQAALLEEDKA 2022

"Ma tahay inay cod bixiyaasha degmada dugsigu u ogolaadaan gudigga dugsiga si loo qarash gareeyo \$95,105,000 taasoo ah cadadka gudigga dugsigu ay go'aamiyeen inay muhiim u tahay xaqiijinteeda sanad miisaaniyeedka?"

Waxaa la qiyaasayaa in miisaaniyadaan lasoo jeediyay, haddii la ansixiyo, waxay abuuraysaa in waxbarashada lagu qarash gareeyo lacag dhan \$17,069.13 halkii ardayba. Maal galintaan la qorshaynaayo ee halkii ardayba waxay 0.89% ka badan tahay maal galinta sanadka hadda socda."

HAA MAYA

2. ISBEDDEL SHARCIYEED OO LA SOO JEEDIYEEY OO AH IN XUBNO LAGU DARO GUDDIYADA GAROONKA DIYAARADAH

"Jaatarka Magaalada Burlington, Sharciyada 1949, lambarka 298, sida wax looga badalay, ma in wax laga sii badalaa si loo kordhiyo tirada guddiga garoomada diyaaradaha si looga dhigo ilaa 7 xubnood, oo ay kujirto in lagu daro wakiil ka socda Winooski iyo wakiil dheeri ah oo ka socda Burlington, iyada oo loo marayo wax ka beddelka Xeerka Magaalada \$120 iyo \$276?"

HAA MAYA

3. ISBEDELKA SHARCIYEED EE LA SOO SAARAY SI LOO MAAREEYO NIDAAMYADA TAMARTA KULAYLKA

"Jaatarka Magaalada Burlington, Sharciyada 1949, lambarka 298, sida wax looga badalay, ma in wax laga sii badalaa si loogu ogolaado Golaha Magaalada inay maareeyaan nidaamyada tamarta kuleylka ee dhismayaasha la degan yahay iyo kuwa ganacsiga, iyadoo loo marayo wax ka badalka Qeybta 48 Awoodaha Golaha Magaalada si loogu daro awooda soo socota:

(67) In la maareeyo nidaamyada tamarta kuleylka ee dhismayaasha la deggan yahay iyo kuwa ganacsiga, oo ay ku jiraan qiimeynta saameynta kaarboonka ama qaababka kale ee lacag bixinada u hoggaansanaanta sharciga, iyadoo looga dan leeyahay in la yareeyo qiiga gaaska ee lagu sii daayo magaalada oo dhan; qiimeyn lagu sameyn karo saameynta kaarboonka ama qaababka kale ee lacag bixinta u hogaansanaanta laguma soo rogi karo marka laga reebo haddii aan mar hore lagu soo oggolaanin aqlabiyadda codbixiyaasha sharciga ah magaalada la sheegay iyagoo u codeeyey su'aasha markii lagu jirey shir sanadle ah ama kulan qaas u ah magaalada oo si sax ah looga digay ujeedada.?"

HAA MAYA

4. ISBEDELKA SHARCIYEED EE LA SOO JEEDIYEEY OO AH IN LA DHAQAN GELIYO CODBIXINTA XULASHADA EE LOOGU TALAGALAY GOLAYAASHA MAGAALADA

"Jaatarka Magaalada Burlington, Sharciyada 1949, lambarka 298 sida wax looga badalay, ma in wax laga sii badalaa si loo dhaqan geliyo codbixinta xulashada ee doorashada golayaasha magaalada laga bilaabo Maarso 2022, iyada oo loo marayo wax ka badalka Xeerka Magaalada § 5?"

HAA MAYA

5. ISBEDELKA SHARCIYEED EE LA SOO JEEDIYEEY SI KIRAYAASHA DHISMAYAASHA DEGAANKA LOOGA ILAALIYO BARAKACIN SABAB LA'AAN AH

"Jaatarka Magaalada Burlington, Sharciyada 1949, Lambarka 298 sida wax looga badalay, ma in wax laga sii badalaa si loo siiyo Golaha Magaalada awood ay kireystayaasha dhismayaasha la degan yahay uga ilaaliyaan barakicinta 'aan la sababayn' iyada oo la dhaqangelinayo laguna daro qaybta cusub 48(66) in

- cadeeynaysa qeexitaannada qaarkood ee sababta;
- 'sababta' ka saaraysa dhicitaanka heshiiska kirada oo sabab u ah joojinta kireysiga, marka laga reebo guryaha qaarkood, oo ku xiran qodobbada xallinta sida ogeysiis ku filan;
- xadideysa kororka kirada aan macquulka ahayn si looga hortago barakicinta ama cusbooneysiin la'aanta kireysiga?"

HAA MAYA

6. OGGOLAANSHAHA IIBINTA XASHIISHKA TAFARIIQA AH

"Magaalada Burlington ma oggolaan doontaa hawlgallada ganacsatada tafaariqlayda ee xashiishka kuwaas oo ay shati siisay Gobolka Vermont sida ku xusan Xeerka 164, laga bilaabo Oktoobar ee 2022, iyadoo iibinta noocan oo kale ah lagu xukminayo sharciyo ama xeerar kasta oo Magaaladu si sharci ah ku qaadata?"

HAA MAYA

7. SU'AALAH LA LA-TALINTA EE CADAALAD CIMILADA OO KU AADAN DHISIDA BAABI'INTA KAARBOONKA

"Codbixiyaasha Magaalada Burlington miyay la talin doonaan Golaha Magaalada iyo Maamulka Duqa Magaalada, ee maareynta nidaamyada tamarta kuleylka ee dhismayaasha la degan yahay iyo kuwa ganacsiga, si loo abuuro siyaasado, barnaamijyo, iyo dhiirigelin diiradda lagu saarayo bixinta gunnooyinka kala gurka ee loogu talagalay dadka reer Burlington-ka ah ee dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dakhligooda dhexdhexaadka yahay, ilaa Dadka Madowga ah, Dadka Asalka ah, iyo dadka aan cadaanka ahayn, iyo haddii kale xubnaha bulshada ee liita?"

HAA MAYA

KU CODEE LABADA DHINAC EE WARAAQDA COD BIXINTA